**Macluumadka Dhibanaha iyo La talin**
Macluumaad ku saabsan Hanaanka Sharci ilaaliyaha & Xeer beegaha

**Macluumaadka warqaddan ku daabacan waxaa kaloo lagu qorey luqaddo kale iyo noocyo kale. Faahfaahin dheeraad ah fadlan la xiriir VIA.**

## HORDHAC

**Macluumaadka Dhibanaha iyo La talin (Victim Information and Advice (VIA)** wuxuu ku siyey warqaddan daabacan maxaa yeeley adiga waxaa tahay dhibane, iyo/ama marqaati, dembi. Qareenada xeer ilaaliyaha sare (Crown Counsel) wuxuu go'aamiyey in dacwaddaan lagu qabto Maxkamadda Aminga iyo Sharci Ilaalinta. Maxkamad qaadida Sharci ilaaliye iyo Xeer beega, xeer beege, wuxuu ka kooban yahay 15 xubnood oo shacabka dadweynaha, ayaga ayaa go'aaminaya xukunka Amniga iyo Sharci ilaaliyahana wuxuu go'aamineyaa dembi ku xukmida.

Sharci ilaaliyaha iyo Xeer beegayaasha ka hor dembiilaha waxaa la siin doonaa **dacwadda qoraal ah** (waa dukumenti sharci) ka soo sheegaya waxa asiga ama ayada lagu soo dacweeyey. Waxaa kaloo ku quran marqaatiyaalka, walxaha ama dukumentiyada laga yaabo in la tixraaco inta dacwadu socoto.

Warqadan daabacan waxay qeexeysaa heerarka hab u socodka Sharci ilaaliyaha iyo Xeer beega.

VIA waxay kaa caawin kartaa hogaaminta inta lagu jirto howshaan.

## VIA WAXAY KU SAABSAN TAHAY

VIA waxa ay qeyb ka tahay Xafiiska Maxkamadda Danbiyada iyo Adeega Xeer Ilaalinta. Xeer ilaalinta (the Fiscal) wuxuu mas'uul ka yahay baaritaanada iyo danbi ku qaadista ka dhaca Scotland.

Shaqaalaha VIA ma aha xeer ilaaliyayaal. Howsheenu waa in saacidno dhibanayaasha, marqatiga iyo sidoo kale, mar marka qaarkood danbiyada lam filaanka, dhaqsaha ama danbiyada la xiriira geerida, qofka la dhashey ee ugu soo dhow.

## QAABKA SHARCI ILAALINTA & XEER BEEGAHA

### Kulanka Koowaad
### (marqaatida ma ah in ay soo xaadiraan):

Dhegeysigaan Sharci ilaaliyahu wuxuu:

- Texgelinayaa arrin sharci kasta ee la soo qaadey;
- Edeysanaha weydiin doonaa in qiranaayo dembiga iyo in kale;
- Cadeynayaa in haddii xeer ilaaliyaha iyo qareenka difaaca diyaar yihiin in ay maxkamd dacwo aadaan.

Haddii eedeysanuhu qirto danbiga, Sharci ilaaliyahu halkaas ayuu ku gudbinayaa xukunku. Sharci ilaaliyaha marar qaarkood waxaa laga yaabaa in uu go'aamiyo in uu **hakiyo (**sii wado) dacwada oo u qabto taariikh dambe si u helo macluumad ku saabsan qofka edeysanaha iyo sidoo kale si uu usoo ogaado nooca xukun ee uu soo heli karo.

Haddii edeysanahu danbiga u qiran waayo, markaa makamad ayaa lagu qaadayaa inta sharci ilaaliyaha iyo Xeer beegayaasha fadhiyaan ayadoo muddo gaar ah loo wada qaban doono dacwada.

## Maxkamad Qaadidda
## (marqaatiyadu waa in ay soo xaadiraan)

Haddii lagaaga baahan yahay in aan cadeen siiso, waxay maxkamadu kuu soo diri doontaa **dalab maxkamadeed (**warqad), tasoo kuu sheegi doonta taariikh iyo saacad lagaa doonaayo in aad timaado maxkamadda. Haddii aadan maxkamadu iman karin maalintaas waa in aad si dhaqi ah ula soo xiriirtaa Xeer ilaaliyaha ama VIA.

Adeega Marqaatiga, wuxuu ku dhex yaalaa Maxkamadda Sharci ilaaliyaha, waxay marqaatiyayaasha siyaan taageero wax tar leh oo waxay kuu qaban karaan balan oo aad ku soo booqato maxkamada ka hor inta aysan dacwadu bilaaban. Haddii aad jeceshahay in VIA ay la xiriirto Adeega Marqatiga ayagoo magacaaga ku hadlaya fadlan noola soo socdsii.

Waxaa laga yaabaa in aad xooga yara sugto maxkamadda ka hor inta aan lagu weydiin in aad soo gasho qolka maxkamadda. Waxay ku xiran tahay qaabka dacwadu u socoto, waxaa laga yaabaa in aan laguu yeerin in aad cadeyn dhiibto ama waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in maalin kale aad soo laabato.

Dacwadu markay socoto, xeer buugaha wuu dhegeysanayaa dhamaan cadeymaha oo wuu wuxuu go'aaminayaa in haddii xukunku yahay **bambiile, danbi laawe** ama **la cadayn kari waa.** Haddii xukunku noqdo bambiile ama la cadayn waayo, edeysanahu wuu iskaga tagi karaa maxkamadda oo halkaas ayay ku dhamaaneysaa dacwada.

**Baahi dheeri**

Haddii luqaddada koowaad ama luqadda aad doorbideyso aysan ahayn Ingiriis, waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay turjumaan kuu sharxa waxa maxkamadda dhexdeeda laga sheegey ama kaa caawiya in aad cadeyn siiso. Tani waa mid laga maar maan ah xitaa haddii aad taqaano Ingiriis kugu filan oo ku meel mar ah.

Waxaa kalagoo laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad heysato dukumentiyo kasta, sida waraaqado ka timid Xeer Ilaaliyaha, ku qoran luqadda aad door bideyso.

Qof kasta ee cadeyn ka bixiya maxkamadda waa in uu marka hore balan qaadaa in uu sheegayyo runta. Balantan waxaad ku dhihi kartaa habka kugu haboon ee diintaadu, luqaddaada ama dhaqankaaga.

Haddii aad meel la'day ama daciifnimo ku heyso, waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in lagu habeeyo si maxkamadda aad ku soo gasho, ama aad cadeyn ku bixiso.

Fadlan usheeg VIA haddii aad qabto wax wal wal ah ama baahi gaar ah. Markaa waxan hubineynaa in Xeer ilaaliyaha iyo maxkamaddaba ay og yihiin tan.

## Xukunka

Mararka qaarkood Sharci ilaaliyaha ayaa si dhaqsi ah u xukma dambiilaha ka dib goorta uu bambiilaha qirto dambigiisa ama dambiga lagu helo.

Sharci ilaaliyaha mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in dacwada dib u dhigo taariikh dambe si uu usoo uruuriyo macluumaad ku saabsan edeysanaha iyo sidoo kale u soo ogaado xukunka kale oo jira oo lagu qaadi karo. Haddii Sharci ilaaliyaha weydiisto warbixin ku saabsan qofka

ama macluumaad kale, taasi micnaheedu mar waliba ma aha in ayagu ku fakirayaan in ay dambiilaha u diraan xabsi. Mararka qaarkood Sharci ilaaliyahu wuu raadinayaa habka ugu wanaagsan ee lala dhaqmi karo dacwad noocaan ah. Haddii Sharci ilaaliyaha uu ku fakirayo in xabsi uu utixaabo marka ay taa dhacdo mar kasta waa loo baah naanayaa in la helo warbixin shaqsiyadeed oo dheeraad ah marka dambiiluhu ka yahay 21 ama weligii uusan xabsi galin.

Goorta dambiiluhu ku jiro xabsi inta dacwadu ay socoto Sharci ilaaliyaha ayaa go'aaminaya haddii asiga ama ayada lagu sii dayn karo lacagta qofka xiran lagu sii daayo iyo in kale ilaa laga xukminaayo.

## Rafcaan

Dambiiluhu rafcaan ayuu ka qaadan karaa dambiga lagu heley iyo/ama xukunkiisa. Rafcaanku waxaa dhegeysanaayo Xaakim ka socda Maxkamadda Sare. Dambiiluhu waxaa laga yaabaa in la sii daayo xukunka ka dib ilaa iyo inta laga dhegeysanaayo rafcaanka haddii Xaakimka ogolaado sii deyntiisa. Tani waxaa loogu yeeraa **Xorriyad ku meel gaar.**

### Macluumaad dheeraad

Fadlan weydii VIA haddii aad jeceshahay macluumaad dheeraad ah ama haddii ay jirto waxkasta ee aadan hubin.

## HAY'ADAHA TAAGEERADA EE MAGAALADA

Waxaa kaloo laga yaabaa in aad jeceshahay in aad la xiriirto:

**Taageerad Dhibanaha ee Scotland**
Ku waa siiya dhibanaayaasha dambi taageero wax tar leh. Faah faahin dheeraad ah la xiriir:

Saacadaha shaqada **0845 60 39 213**
www.victimsupportsco.org.uk

**Adeegyada Marqaatiga**
Ku waasoo dhamaan marqaatiyada iyo dhibanayaasha, qooskooda iyo saaxiibadooda siiya taageero wax tar leh, goorta ay maxkamada soo xaadirayaan

> Faah faahin deeraad ah oo ku saabsan Adeega Marqaatiga ee Degmada fadlan la xiriir Taageerida Dhibanaha ee Scotland.

## LA XIRIIR VIA

Macluumad dheeri ah fadlan la xiriir xafiiska VIA ee magaaladaada, talefoonka ku qoran warqadda ku lifaaqan. Baddalkeed fadlan la soo xiriir Xafiiska Qaranka ee Xafiiska Qaranka ee VIA, Caledonian House, Greenmarket, Dundee DD1 4QA ama adigoo soo waca 01382 341185 oo waxaan ku siin doonaa faah faahin dheeraad ah ee ku saabsan xafiiska VIA ee degmadaada.

www.crownoffice.gov.uk

Macluumaadka Dhibanaha iyo Latalinta, wuxuu qeyb ka yahay Xafiiska Maxkamadda Danbiyada iyo Adeegga Xeer Ilaalinta